SHARCIGA LA SOO JEEDIYEY EE DHAQAMADA BADANEE VICTORIA 2011
HADALKA AKHRISKA LABAAD EE
MUDANE. NICHOLAS KOTSIRAS, MP

Waxaan soo jeedinayaa in sharcigan la soo jeediyey hadda la akhriyo mar labaad.

Dawlada waxaa ka go'an oo ay ogoshahay dhaqamada badan ee Victoria, waxayna dhaqan gelin doontaa in Victoria sii wado ku hogaaminta qaranka intiisa kale arrimaha dhqamada badan. Sharciga la soo jeediyey ee Dhaqamada badan ee Victoria 2011 waxay bixin doontaa qayb muhiim ah oo ka mid ah go'aankan iyadoo ku bedelaysa Golaha Dhqamada badan ee Victoria hay'ad sharciyeed oo ka xooggan kana madax bannaan.

Guddigu waa hay'ada ugu muhiimsan ee la talinta dawlada xagga arrimaha dhaqamada badan una shaqeysa sidii dhuunta u dhaxeysa bulshada Victoria iyo Dawlada Victoria. Waxaana rumeysanahay inay muhiim tahay codka ugu horeeya ee bulshooyinka ku kala duwan luuqad, jinsiyad, diin iyo dhaqan ahaanba. Sharcigan la soo jeediyey, fekerkan waxaa qabanaya ereyga ah "kala duwanaanta".

Dulmarka guud ee Sharciga la soo jeediyey

Sharcigan la soo jeediyey wuxuu bixinayaa siday uga go'an tahay dawlada inay dib u qaabeyso una xoojiso jagada arimaha dhaqamada badan, oo uu ku jirto Guddiga Dhqamada badan ee Victoria. Sharcigan la soo jeediyey wuxuu ku gaadhayaa ujeedadan saddex siyaalood:

- Ta koowaad, Sharcigan la soo jeediyey wuxuu kordhinayaa madax bannaanida Guddiga isagoo dhisaya hay'ad sharci oo cusub. Hay'ada sharciga ee cusub waxay lahaanaysaa magaca ah Guddiga Dhaqamada badan ee Victoria, laakiinse waxay xoogga saareysaa xoojinta bulshadeena.madax bannaanida Guddiga waxaa kordhiya awooda cusub ee ah cilmi barista, u soo warbixinta iyo sida tooska ah ula talinta wasiirka arimaha bulshada ee caaddiga ah ee la xiriira ujeedooyinka guddiga. Arimahan waxaa laga yaabaa in lagu garto Golayaasha La tallinta Degmooyinka ama la tashiyada kale ee bulshada ama waxaa laga yaabaa inay la xiriiraan ku filnaanta adeegyada bulshada, bixinta adeegyada dawlada iyo ku filnaantooda, taageerada dejinta iyo u qabashada adeegyo bulshooyinka kala duwan.
- Ta labaad, Sharciga la soo jeediyey wuxuu abuuri doona xiriirada u dhaxeeya dawlada iyo bulshooyinka kala duwan iyadoo loo marayo Golayaasha La talinta Gobolada.
- Ta saddexaad, Sharciga la soo jeediyey wuxuu aqoonsanayaa dhammaan tallaabada dawladu ay ka qaadayso dhaqamada badan oo leh qoraal khaas ah.

Waxaa taas sii weheliya, Sharciga la soo jeediyey ee Dhaqamada badan ee Victoria 2011 wuxuu bedelayaa Sharcigii 2004 ee Dhaqamada badan ee Victoria isagoo:

- Cusbooneysiinta xeerarka dhaqamada badan;
- Kor u qaadida ujeedooyinka Guddiga cusub iyo shaqooyinkiisa; iyo
- Sii wadida warbixin ka siinta Wasaaradaha Dawlada waxyaalaha la xiriira dhaqamada badan.

Golaha Dhaqamada badan ee Victoria

Dhisitaanka Guddiga Dhaqamada badan ee Victoria oo aad uga madax bannaan ayaa abuuri doona xiriir xoog badan oo u dhaxeeya dawlada iyo bulshooyinka kala duwan ee Victoria.

Guddiga cusub wuxuu xoogga saarayaa siinta caawimaad dadka Victoria waxaana rajeynayaa inay siin doonaan tallo daacad ah oo aan waxba kala hareynin dawlada.

Madax bannaanida Golaha waxaa lagu gaarayaa iyadoo la adeegsanayo sharciga cusub iyo nidaamka maamul ee awooda u siin doona inay si toos ah tallo ii siiyaan aniga, wasiir masuul ah awgii, arimaha nidaamka ah iyo fursadaha bulshooyinka kala duwan.

Golaha cusub wuxuu yeelan doona shaqada dheeraadka ah ee cilmi barista, la tallinta iyo warbixin siintayda, masuul wasiir ahaan. Shaqooyinkan waxaa bilaabi kara mid kood Golaha ama waxaa codsan kara aniga.

Si loo fududeeyo shaqooyinka warbixinta Golaha, Madaxda Wasaaradaha ee ay u yimaadaan Goluhu iyagoo macluumaad doonaya waa inay hubiyaan inay qaadaan tallaabo kasta oo macquul ah oo lagaga caawinayo Golaha fulinta cilmi baaristiisa.

Laba iyo toban ah xubnaha golaha ayaa uu magacaabi doona Xeer ilaaliyaha Goluhu oo noqda Golaha cusub, oo ay ka mid yihiin:

- Guddoomiye wakhti buuxa shaqeeya;
- Guddoomiye ku xigeen wakhti dhiman shaqeeya;
- Sideed xubnood oo wakhti dhiman shaqeeya oo leh khibrad iyo xirfad gaar ah;
- Wakiilka dhalinyarada oo wakhti dhiman shaqeeya; iyo
- Wakiilka ururada bulshada oo aan anigu go'aanka magacaabista yeesho wakhti dhimana shaqeeya.

Golaha cusub wuu ka madax bannaanaan doona Wasaaradaha Dawlada Guddoomiyaha Goluhuna wuxuu yeelan doona awooda uu ku shaqaaleysiiyo shaqaale oo uu ku galo qandaraasyo. Shaqaalaha waxaa loo shaqaaleyn doona sidii shaqaale dawladeed oo kale waxaana ay hoos imanayaan xeerka Anshaxa ee Hay'adaha Dadweynaha ee Victoia.

Golayaasha La tallinta ee Degmooyinka

Sharciga la soo jeediyey wuxuu bixinayaa in sideeda xubnood ee Golayaasha Latallinta Degmooyinka la sameyn doono goobaha degmooyinka dawlad goboleedka. Golayaashu waxay si aad dhow ula shaqeyn doonaan bulshooyinka kala duwan waxayna u shaqeyn doonaan sidii dhuumaha macluumaadka arimaha ku saabsan ee khuseeya shaqooyinka Golaha oo ay ka mid yihiin bixinta adeega iyo dejinta degmooyinka.

Sideed ka mid ah xubnaha Golaha ee wakhtiga dhiman shaqeeyaa wuxuu mid kastaa guddoomin doona Golaha La talinta Degmooyinka, iyadoo loo ogolaanaya inay isticmaalaan aqoontooda iyo xirfada ay u leeyihiin degaankooda si ay uga siiyaan marin toosan dawlada arimaha degmooyinka ee heysta bulshooyinka kala duwan, oo ay ku jiraan tallada wax ku oolnimada ee isticmaalka adeegyada dawlada iyo taageerada dejinta.

Iyadoon lagu caddeyn Sharciga la soo jeediyey, waxaa la qasdayaa in Golayaasha La tallinta Degmooyinku ay yeelan doonaan dhawr shaqo , oo ay ku jirto:

- Ta koowaad, Golayaasha La tallinta Degmooyinku waxay adeegsan doonaan xirfadaha iyo aqoonta xubnaha bulshada ee degaanka si ay u siiyaan tallo Golaha arimaha iyo fursadaha ay soo jeediyaan dadweynaha kala duwan ee degmooyinka iyagoo xoogga saaraya wax ku oolnimada iyo isticmaalka adeegyada dawlada iyo taageerada dejinta.
- Ta labaad, Golayaasha waxay la shaqeyn doonaan ganacsiyada degaanka, loo shaqeeyayaasha, iyo saraakiisha horumarinta ganacsiyada gobolka si loo caawiyo wadooyinka shaqooyinka soo baxaya iyo kor u qaadida degmooyinka Victoria inay yihiin meeshii ay dooran lahaayeen soogalootiga dhawaan yimid.
- Ta saddexaad, Golayaashu waxay qaban doonaan fikrad iswaydaarsiyo khuseeya degmooyinka oo ay ku gartaan fursadaha ay ugu dabaaldegayaan wax ka geysashada

dhaqamada kala duwan iyo diimaha Victoria iyo inay dhiirigeliyaan bulshadu inay is heysato oo ay wanaag ku wada noolaato.

Warbixinta ay ka Doonayaan Wasaaradaha Dawladu

Sharciga waxaa hoos imanaya, Wasaaraddaha Dawlada oo laga dooni doono inay aniga warbixinta i soo siiyaan, wasiir masuul ah ahaaneed, sannad xisaabeed kastaa oo khuseeya siday wasaaraddu kor ugu qaaday ama sida kale u taageertay bulshada dhaqamada badan ee Victoria. Tani waxay la socotaa waajibaadkii Sharcigii Dhaqamada badan ee Victoria 2004.

Xeerarka Dhaqamada badan

Dawlada waxay u tixgelisaa dhalashada Australiya inay tahay aasaaska lagu dhisayo bulsho xoog badan oo mideysan, halkaas oo shakhsiyaadku wax kala bartaan oo ay si wada jir ah isu caawiyaan si ay u sameeyaan bulsho si aad ah isu heysata oo wanaag kuwada nool. Fekerka dhalashada ee ku jira sharcigan la soo jeediyey kuma koobna oo kaliya dhalashada tooska ee Australiya laakiinse wuxuu tixraacayaa bedel ahaan xuquuqaha iyo masuuliyaadka dhammaan dadka ka mid ka ah bulshada dhaqamada badan. Fikrada dhalashadu waxay ku mideysaa bulshadeena kala duwan waxyaalaha ka go'an oo ay wadaagaan ee qarankeena iyo hay'adahiisa diimuqraatiga ah , sharciyada, qiimayaasha iyo fikrada ah ' fursad caddaalad ah'.

Sharcigan la soo jeediyey wuxuu cusbooneysiinayaa xeerarka dhaqamada badan si uu ugu darro xeerarka dhalashada, qiimayaasha ka go'naanta la wadaago ee Australiya iyo adeega bulshada iyo aqoonsiga kala duwanaanta oo u ah hanti Victoria. Sharciga la soo jeediyey wuxuu sidoo kale bixiyaa in Baarlamaanka uu taageero fikradaha dhalashada iyo kala duwanaanta isagoo aqoonsanaya xeerarka dhaqamada badan, oo ay ku jiraan xushmad laba dhinac ah iyo fahamka kor u qaadida kala duwanaanta iyo hidaha iyo helitaanka fursadaha iyo ka qayb qaadashada. Xeerarka dhaqamada badan waxay caawiyaan bulshada inay noqoto mid aad isula jirta iyo bulsho wanaag ku wada nool.

Gabagabo

Sharciga la soo jeediyey ee cusub ee dhaqamada badan 2011 wuxuu caawinayaa oo hubinayaa in adeegyada dawlada Victoria ay fuliyaan baahida bulshadeena dhaqamada badan ee kordheysa, iyo in codadka bulshadeena kala duwan in si wanaagsan loo maqlay.

Sharcigan la soo jeediyey wuxuu xoojinayaa tallaabada Victoria ay ka qaadeyso dhaqamada badan iyo dhalashada, waxayna bixineysaa aasaaska dhisida bulsho xoogan oo mideysan.

Waxaan u ammaanayaa Sharcigan baarlamaanka.